



Dugsiyada PPS oo u diyaar garoobi doona dhul gariirka inta lagu jira Dhacdada Gariirka Weyn ‘Great Shakeout’ ee la qabanayo Oktoobar 18

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay ku biiri doonaan kumanaan dugsiyada degmada oo kale oo ku yaala Maraykanka iyaga oo ka qayb qaadanaya Dhacdada Gariirka Weyn ‘Great Shakeout’, kaasi oo ah dhacdo qaran oo loogu talagalay isku diyaarinta dhul gariir dhaca oo la qabanayo Arbacada, Oktoobar 18.

Degmadu waxay ka qayb qaadan doontaa Dhacdada Gariirka Weyn ee Oregon [Great Oregon Shakeout](#), iyada oo inta badan dugsiyada PPS ay ka qayb qaadanayaan kaasi oo la qabanayo Oktoobar 18. Dhammaan dugsiyada PPS waxaa looga baahan yahay in ay qabtaan tababarada layli ee dhul gariirka inta lagu jiro sanad dugsiyeedka, iyada oo kuwa aan ka qayb qaadanin Dhacdada Gariirka ‘Shakeout’ ay qaban doonaan tababarka layli bisha Oktoobar gudaheeda. Dugsiyadu waxay sidoo kale sameyn doonaan tababar layli bisha Abriil iyada oo qayb ka ah Bisha Isku diyaarinta Dhul gariirka.

Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay isku keenaan qorshaha xaalada degdega ah ee qoyska. Ilo waxtar leh ayaa waxa ah [website-ka ready.gov](#).

Kooxda Maamulka Xaalada Degdega ah ee PPS ayaa haysa macluumaad kale oo ku jira [website-keeda](#) kuwaasi oo ku saabsan isku diyaarinta dhul gariirka, oo uu ka mid yahay macluumaadkani:

Marka lagu daro tababarada layli ee xaalada degdega, goob dugsi oo kastaa waxay leedahay:

- Raadiyayaal laba dhinac ah oo ay kula xiriiraan shaqaalaha inta lagu jiro xaalada degdega ah marka ay dhacdo in hababka caadiga ah ee isgaarsiineed aanay jirin.
- Dhammaan fasalladu waxay ku qalabseyan yihiin weelal loogu talagalay xaalada degdega ah oo lagu keydiyo sahayda degdeg ah. Goobaha dugsiyada oo badan ayaa leh meelo dheeraad ah oo lagu keydiyo biyaha iyo sahayda gargaarka degdega ah oo ku yaala ama ku dhow dhismayaasha dugsiyada.

Inta lagu jiro dhul gariir, ardayda iyo shaqaaluhu waxay:

- Isku tuuri doonaan dhulka, Isqarin doonaan waxayna Joogi doonaan halkaasi ‘Drop, Cover, iyo Hold’ ilaa inta gariirku ka joogsanayo.
- Marka uu gariirku joogsado, macallimiinta ayaa fasalkooda ka fiirin doona haddii ay jiraan wax arday ah oo dhaawac ah.

- Shaqaaluhu ayaa qof kasta u qaadi doon garoonka cayaaraha, goobta ciyaarta, ama meelo kale furan oo ammaan ah oo ku yaala dhismaha. Daadgureyntu waa mid lagama maarmaan ah ka dib marka dhul gariir dhaco iyada oo sababtu tahay burbur suurtagal ah oo laga yaabo in uu soo gaaro dhismayaasha iyo dhul gariirka taasi daba socda.
- Macallin kasta waxaa loo qoondeeyay meel garoonka ku taala oo loogu talagalay ardaydiisa, iyada dhammaan ardaydana la tiriyo.
- Goob dusgi oo kastaa waxay leedahay koox xaalada degdega ah oo ka kooban xubnaha shaqaalaha ee dugsigu. Kooxda xaalada degdega ah waxay sameysaa wax raadin iyo samata-bixin, gargaarka xaalada degdega ah, iyo hawl galada musiibadaa ka dib marka dhul gariir dhaco.